



OPEN ENROLLMENT (MUDDADA DIWAANGELINTA  
SANADLAHA AH EE CEYMISKA CAAFIMAADKA) 2023

# Hagaha Dheefaha Caafimaadka



Evelyn K.  
Daryel bixiye, Des Moines

## Isku diiwaangeli ama wax ka baddel ceymiskaaga caafimaadka Luulyo 1 – Luulyo 20 barta [myseiu.be/oe-so](http://myseiu.be/oe-so).

Haddii aadan rabin inaad wax ka baddel samayso, wax ficiil ah looma baahna.

### Waxa cusub sanadkan - Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha!)

U hel isla caymiska caafimaadka iyo ilkaha ee tayada sare leh ee aad haysato, ilmahaaga! Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ayaa ah fursadi aad ku darsan lahayd dheeftaan cusub.

Ver en español: [myseiu.be/oe-es](http://myseiu.be/oe-es)

查看中文版: [myseiu.be/oe-zh](http://myseiu.be/oe-zh)

한국어로 보기: [myseiu.be/oe-ko](http://myseiu.be/oe-ko)

Посмотреть на русском: [myseiu.be/oe-ru](http://myseiu.be/oe-ru)

Переглянути укр: [myseiu.be/oe-ua](http://myseiu.be/oe-ua)

Xem bằng Tiếng Việt: [myseiu.be/oe-vi](http://myseiu.be/oe-vi)

Ku eeg Af-Soomaalii: [myseiu.be/oe-so](http://myseiu.be/oe-so)

ਪੰਜਾਬੀ ਵਿੱਚ ਪੜ੍ਹੋ: [myseiu.be/oe-pa](http://myseiu.be/oe-pa)

မာစ်ဗာဂီရိနှင့်ရွှေ့ခြွား: [myseiu.be/oe-kh](http://myseiu.be/oe-kh)

عرض باللغة العربية: [myseiu.be/oe-ar](http://myseiu.be/oe-ar)

**Wixii Su'aalo ama  
Caawimaada Luuqadda ah:  
Wac 1-877-606-6705**

8 a.m. - 6 p.m., Isniin ilaa Jimce

## JADWALKA TUSMADA

Daryeel Bixiyaha Qaaliga Ahoow,

Luulyo 1-20 ayaa ah fursadi aad ku heli lahayd ceymiska daryeelka caafimaad oo tayo sare leh, oo la awoodi karo inta lgu jiro open enrollment (muddada diiwaangelinta sanadlaha ah ee ceymiska caafimaadka).

Daryeel bixiyeyaasha waxay qabtaan shaqo muhiim ah si ay u xaqiijiyaan in dadka aan jecelnahay iyo bulshooyinkeena ay helaan caafimaad iyo badqab. Wuxaan sidoo kale muddan tahay dayeel wanaagsan!

Taasi waa sababta qorshayaasha caymiska ee SEIU 775 Benefits Group loo qaabeeyay iyada oo maskaxda lagu hayo daryeel bixiyeyaasha. Caafimaadka, ilkaha, toosinta Ilkaha, aragga, maqalka, caafimaadka dareenka, dheefaha daawada dhakhtarka uu qoro iyo kuwa kale oo badan ayaa dhamaantood ku jira - qiiamaha jaban ee \$25 bishii ee caymiska laguugu talagalay adiga.

Wuxaan nala wadaagtay sida ay muhiim u tahay in ilmahaaga ay sidoo kale yeeshan caymiska daryeelka caafimaad, waana ku faraxsanahay inaan kula wadaago warka ugu weyn sanadkan — Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)! Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) wuxuu siinayaa carruurtaada isla caymiska wanaagsan ee aad adigu haysato. Ka agoow wax kasta oo ku saabsan dheeftaan bogga 4.


Sanad walbo, waxaan ku dadaalnaa inaan xaqiijino inaan wax ka baddel ku sameeyno caymiskaaga daryeelka caafimaad kuwaas oo faa'iido u ah adiga iyo qoyskaaga.

Isticmaal Hagahan Dheefaha Caafimaadka si aad:

- Si wanaagsan ugu fahamto qorshahaaga ceymiska caafimaad.
- Iskaga diiwaangeliso caymiska daryeelka caafimaadka markii ugu horraysay, ugu darsato ilmaha caymiskaaga hadda jira ama aad wax uga baddesho caymiskaaga ilkhaa.
- Wax badan uga ogaato dheefaha kale ee muhiimka ah ee aad heli karto.

Anigoo ku hadlaya magaca SEIU 775 Benefits Group, waad ku mahadsan tahay inaad dadka kale daryeesho! Waxay inoo tahay sharaf inaad ku siino caymiska daryeelka caafimaadka oo loogu talagalay baahiyaha caafimaadka iyo fayo-qabka ee adiga iyo carruurtaada.

Caafimaad Wanaagsan,

  
Merissa Clyde

Madaxa Sargaalka Fulinta (CEO),  
SEIU 775 Benefits Group



### 3 Caymiska Caafimaad ee Laguugu Talagalay

U hel caymiska caafimaadka iyo ilkaha adiga nafsadaada haddii aad shaqayso 80 saacadood ama ka badan bishi.

### 4 Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

U hel caymiska caafimaadka iyo ilkaha ilmahaaga haddii aad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi.

### 5 Sida Loo Helo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

Wax badan ka ogoow Caddeynya Qofka Kugu Tiirsan iyo tallaabooyinka kale ee aad u baahan tahay inaad qaado.

### 6 Goorta La Codsado / Wax Ka Baddel La Sameeyo

Fahan goorta aad isku diiwaangelin karto caymis cusub ama aad wax ka baddeli karto caymis horay u jiray.

### 8 Sida La Isku Diiwaangeliyo / Wax Ka Baddel Loo Sameeyo

Eeg tilmaamaha aad iskuugu diiwaangelin karto ama wax kaga baddeli karto caymiskaaga onleen ahaan ama boostada.

### 9 Sida Loo Ilaashado Caymiska

Ogoow sida aad u sii haysan karto caymiska iyo waxa la sameeyo haddii aad lumiso caymiska.

### 10 Dheefaha Kale ee Muhiimka ah

Wax ka ogoow dheefaha kale ee aan kharashka ku fadhiniin ee aad heli karto ee gacan ka gaysan kara tayada noolashadaada.

### 11 Qoddobada Kooban Ee Ceymiska Caafimaadka

Eeg faahfaahinta qorshayaasha iyo sida looga helo faa'iidda ugu badan caymiskaaga.

### 16 Noocyada Caymiska Ilkaha


Wax ka ogoow 2-daada nooc ee caymiska ilkaha: Delta Dental iyo Willamette Dental.

### 21 Erayada Guud ee Ceymiska

Baro qeexitaanada qaar ka mid ah erayada guud ee ceymiska oo si wanaagsan u fahan caymiskaaga.

### 22 COBRA

Wax ka ogoow sida COBRA ay u bixiso caymiska daryeelka caafimaad oo sii socda haddii aad lumiso caymiska.



Maureen C.  
Daryeel bixiye, Spokane

# Waxa Cusub Sanadkan!

## Hel Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

Haddii aad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi, waxaad ku darsan kartaa caruruutaada (ilaa iyo taariikhdooda dhalashada ee 26<sup>aad</sup>) caymiskaaga!

Mid ka dooro 2-da nooc ee caymiska:

- **Caymiska caafimaadka iyo ilkaha oo dhamaystiran** oo ah kaliya \$100 bishi, dhammaan caruruutaada (waxaad ku daraysaa \$25 caymiskaaga).\*
- **Caymiska Ilkaha kaliya** oo ah kaliya \$10 bishi, dhammaan caruruutaada (waxaad ku daraysaa \$25 caymiskaaga).

Ka ogoo wax badan oo ku saabsan sida loo helo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) bogga 4 iyo 5.

\*Lacagta aad bil walbo bixinayso (lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah) caymiskaaga iyo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) waa \$125.

## Dheefaha Cusub ee Laguugu Talagalay

Isbaddelada lagu sameeyay caymiskaaga sanadkaan:

- \$0 khidmada adeegga ceymiska ee insuliinta baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo ama insuliinta shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo.
- Daryeelka baddelka ah ee la kordhiyay (sida daawaynta jir duridda iyo daryeelka u jimcinta) ayaa hadda la dabaraa ilaa iyo 20 booqosho sanad walbo.
- Daryeelka daawaynta dabiiciga ah oo aan xad lahayn.
- Dheefta dhalmo la'aanta oo sare loo qaaday, oo ay ku jirto dheefta farmsiga oo cusub oo loogu talagalay baahiyaha dhalmada.

Ka eeeg waxa kale ee la dabaro Soo Koobidata Qorshaha Ceymiska ee bogga 13.

## Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadla ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee Caymiska Daryeelka Caafimaadka: Luulyo 1-20

**Luulyo 20 ayaa ah taariikhdaada kama dambaysta ah ee aad:**

- ✓ Codsan karto caymis, haddii aad xaq u leedahay oo aadan horay isku diiwaangelin.
- ✓ Wax kaga baddeli karto ceymiskaaga ilkaha, haddii aad diiwaangashan tahay.
- ✓ Heli karto Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)! Ku darso caymiska caafimaadka iyo/ama ilkaha ee caruruutaada, haddii aad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi.

**Soo gudbi Codsigaaga Dheefaha Caafimaadka oo dhamaystiran marki la gaaro ama ka hor Luulyo 20 onleen ahaan ama boostada.**

**Ka eeg bogga 7-aad wixii faahfaahin ah ee ku saabsan sida loo codsado.**

Wax ka baddelka la sameeyay inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadla ah ee Ceymiska Caafimaadka) wuxuu dhaqangeli doona Agoosto 1, 2023. Wax ficiil ah lagaagama baahna haddii aadan rabin inaad baddesho caymiskaaga hadda jira. Haddii aadan wax ficiil ah samaynin, ma awoodi doontid inaad codsato ama wax ka baddel samayso ilaa iyo laga gaaro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadla ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee xigta, marka laga reebo inaad yeelato Dhacdo Nololeed Muteysi Leh ma ahane, sida inuu ilmo kuu dhasho ama aad lumiso caymis kale oo daryeelka caafimaad.

**Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo codsiga ama ma qabtaa su'aalo?**  
**Wac 1-877-606-6705.**

# Caymiska Laguugu Talagalay

**Ku hel ceymiska  
caafimaadka iyo ilkaha oo  
tayo sare leh kaliya \$25  
bil walbo iyaga oo leh  
dheefaha soo socda:**

Booqashooyinka Dhakhtarka  
Assaasiga oo Bilaash ah

Caafimaadka

Ilkaha

Toosinta Ilkaha

Caafimaadka Dareenka

Aragga

Maqalka

Dhalmo la'aanta

Daryeel Ku Habboon Jinsiga uu  
Qofka Doorto

Daawada Dhakhtarku Qoro

Daryeelka Baddelka ah

Daryeelka U Jimcinta

Ka ogoow wax badan oo ku saabsan Qoddobada  
Kooban Ee Ceymiskaaga Caafimaadka bogga 11.

## Sideen xaq ugu yeeshaa oo ugu sii lahaadaa?

Waxaad xaq u leedahay ceymiska daryeelka caafimaadka ee laga helo SEIU Healthcare NW Health Benefits Trust markaad **shaqaysa 80 saacadood ama ka badan bishi**, 2 bilood oo isku xiga oo aad sii wado inaad shaqaysa 80 saacadood ama ka badan bishi si aad xaq ugu sii lahaato.

## Goormee ayaan codsan karaa?

Waxaad codsan kartaa caymiska mid kasta oo ka mid ah wakhtiyadaan:

- ✓ Inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlahaa ah ee Ceymiska Caafimaadka), Luulyo 1-20 sanad walbo.
- ✓ Markaad xaq u yeelato caymiska marki ugu koowaad.
- ✓ Haddii aad leedahay "Dhacdo Nololeed Muteysi Leh" sida luminta caymis aad ku heli jirtay adiga oo u marayo xaaS/seey ama caymis bixiye kale. Wax badan ka baro bogga 6.

## Sidee ayaan u codsaa?

Waxaad ku codsan kartaa caymiska:

- Onleen ahaan barta Health: *My Plan* ee barta [myseiu.be/oe-myplan](http://myseiu.be/oe-myplan).
- Adiga oo isticmaalaya Codsiga Dheefaha Caafimaadka oo ku jira xirmadaan.

Tilmaamaha codsiga ayaa laga heli karaa bogga 7.

## Goormee ayuu caymiskayga bilaaban doonaa?

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha xaq u yeelashada oo aad buuxisay Codsiga Dheefaha Caafimaadka inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlahaa ah ee Ceymiska Caafimaadka), caymiskaaga wuxuu bilaaban doonaa Agosto 1, 2023.

## Sideen u ilaashadaa caymiskayga?

Si aad u ilaashato caymiskaaga waxaa qasab ah inaad:

- ✓ Sii wado inaad shaqaysa 80 saacadood ama ka badan bil walbo.
- ✓ Sii waado inaad bixiso lacagta \$25 ee aad bil walbo bixiso (qaybta lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah).

## Maxaa dhacaya haddii aan lumiyo caymiska?

Haddii aad lumiso caymiska, waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan caymiska sii wadida ee laga helo COBRA. Wax badan ka akhri bogga 22. Haddii aad bilowdo inaad markale shaqaysa ugu yaraan 80 saacadood bishi inta lagu jiro 12 bilood gudahooda, caymiskaaga ayaa si toos dib ugu bilaaban doona. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka tixraax bogga 9.

# Coverage for Kids

## (Caymiska Ilmaha)

**Waxa Cusub Sanadkan!**  
**Waxaad carruurtaada ku dari**  
**kartaa caymiskaaga (ilaa iyo**  
**dhalashadooda 26aad).**

Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha), waxay ku heli karaan ilmahaaga caymiska caafimaadka iyo ilkaha oo ku kacaya \$100 bishi ama caymiska ilkaha kaliya oo ku kacaya \$10 oo kaliya bishi. Ilmahaaga waxay helaayaan dhammaan dheefooyinka wanaagsan ee aad hesho, oo uu ku jiro caafimaadka dareenka.

**Kharash intee dhan ayuu**  
**ku kacaya?**

Haddii aad carruurtaada u diiwaangeliso caafimaadka iyo ilkaha, lacagta aad bil walbo bixinayso waa \$100 bishi, waxaad ku daraysaa \$25 caymiskaaga. Haddii aad carruurtaada u diiwaangeliso ilkaha kaliya, lacagta aad bil walbo bixinayso waa \$10 bishi, waxaad ku daraysaa \$25 caymiskaaga. **Lacagta aad bil walbo bixinayso ee Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) waa isku mid, iyada oo aan loo eegin inta caruur ah oo aad leedahay!**

	Caafimaadka iyo Ilkaha	Ilkaha Kaliya
Adiga Kaliya	\$25	Lama heli karo
Adiga+ 1 cunug	\$125	\$35
Adiga+ 2 ilmood	\$125	\$35
Adiga+ 3+ ilmood	\$125	\$35

**Haddii aad su'aalo qabto**  
**ama aad u baahan tahay**  
**in lagaa caawiyo inaad**  
**codsato Coverage for Kids**  
**(Caymiska Ilmaha), wac**  
**1-877-606-6705.**

### **Sideen Ku Helaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?**

Si aad u hesho Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha), waxaa qasab ah inaad shaqayso **120 saacadood ama ka badan bishi** oo aad sii wado inaad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi si aad u sii haysato.

Haddii aad haddadan shaqayn 120 saacadood ama ka badan balse aad jeceshahay inaad hesho Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha), buuxi Codsiga Dheefaha Caafimaadka inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiendaangelinta Sanadlahaa ah ee Ceymiska Caafimaadka). Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) wuxuu bilaabmi doono markaad biilowdo inaad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi.

### **Goormee ayaan codsan karaa?**

Waxaad codsan kartaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha):

- ✓ Inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiendaangelinta Sanadlahaa ah ee Ceymiska Caafimaadka), Luulyo 1-20 sanad walbo.
- ✓ Markaad xaq u yeelato caymiska marki ugu koowaad.
- ✓ Haddii aad leedahay "Dhacdo Nololeed Muteysi Leh" sida inuu ilmo kuu dhasho ama aad ilmo korsanayso. Wax badan ka baro bogga 6.

### **Sidee ayaan u codsaa?**

Waxaad ku codsan kartaa caymiska:

- Onleen ahaan barta Health: *My Plan* ee barta [myseiu.be/oe-myplan](http://myseiu.be/oe-myplan).
- Adiga oo isticmaalaya Codsiga Dheefaha Caafimaadka oo ku jira xirmadaan.

Haddii aad doorato inaad ilmo ku darsato caymiskaaga, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso dukumiintiga Cadeynta Qofka Kugu Tiirsan oo caddaynaya xiriirka kaala dhaxeeyo cunug walbo oo aad ku darsato. Tilmaamaha codsiga iyo macluumaad kale oo dheeraad ah oo ku saabsan Cadeynta Qofka Kugu Tiirsan ayaa laga heli karaa bogga 5.

### **Goormee ayuu Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) bilaaban doonaa?**

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha xaq u yeelashada oo aad gudbiso Codsiga Dheefaha Caafimaadka oo dhamaystiran inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiendaangelinta Sanadlahaa ah ee Ceymiska Caafimaadka), caymiska wuxuu bilaaban doonaa Agoosto 1, 2023.

### **Sideen u Ilaashadaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?**

Si aad u sii haysato Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) waxaa qasab ah inaad:

- ✓ Sii wado inaad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bil walbo.
- ✓ Sii wado inaad bixiso lacagta aad bil walbo ka bixiso (lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah) adiga iyo carruurta kugu tiirsan.

### **Maxaa dhacaya haddii aan lumiyo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?**

Haddii aad lumiso Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha), waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan caymiska sii wadida ee laga helo COBRA. Wax badan ka akhri bogga 22. Haddii aad biilowdo inaad markale shaqayso ugu yaraan 120 saacadood bishi, Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ayaa si toos dib ugu bilaaban doona. Ilaa iyo inta aad shaqaynayso ugu yaraan 80 saacadood bishi, caymiskaaga shaqsieyed ayaa sii socon doonaa.

# Sida Loo Helo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

U hel isla caymiska caafimaadka iyo ilkaha ee tayada sare leh ee aad haysato, ilmahaaga! Haddii aad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi, waxaad u heli kartaa caymiska caafimaadka iyo/ama ilkaha carruurtaada kugu tiirsan (ilaa iyo taariikhdooda dhalashada ee 26<sup>aad</sup>)!

## Sida Loo Helo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

Haddii aad rabi lahayd inaad carruur ku darsato caymiskaaga:

- ✓ Shaquee ugu yaraan 120 saacadood bishi.
- ✓ Buuxi qaybta Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ee Codsiga Dheefaha Caafimaadka, onleen ahaan ama boostada. Wuxaan u baahan doontaa inaad u doorato nooca caymiska carruurtaada (caafimaadka iyo ilkaha oo ku kacaya \$100 ama ilkaha kaliya oo ku kacaya \$10 bishi).
- ✓ Soo gudbi dukumiintiga Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan oo caddaynaya xiriirk kaala dhaxeyyo ilmahaaga(carruurtaada) oo uu la socdo Codsigaaga Dheefaha Caafimaadka oo dhamaystiran.
- ✓ Bixi cadadka lacagta bil'laha ah ee looga baahan yahay nooca caymiska ee aad u dooratay carruurtaada (\$100 ee caymiska caafimaadka iyo ilkaha, ama \$10 caymiska ilkaha kaliya). Tani kuma jirto cadadkaaga qaybta lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah ee gaarka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka tixraax bogga 4.

## Yaan ku dari karaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?

Waxaad ku dari kartaa carruurta xaga u leh (ilaa iyo taariikhdooda dhalashada ee 26<sup>aad</sup>).

Qaar ka mid ah carruurta kugu tiirsan ee xaqa u leh waa:

- Ilmaha aad dhashay.
- Ilmaha la korsaday.
- Carruurta uu seeygaaga/xaaskaaga dhashay ama carruurta lamaanahaaga qoyska.

Si aad u hesho liiska dhamaystiran ee kuwa xaqa u leh carruurta kugu tiirsan ahaan, booqo [myseiu.be/cfk-so](http://myseiu.be/cfk-so).

## Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan

Markaad diiwaangeliso carruurta kugu tiirsan, waxaad u baahan doontaa inaad caddayso xiriirk kaala dhaxeyya iyaga ka hor inta uusan caymiska bilaabaniin. Waa inaad dukumiinti ka soo gudbisaa cunug walbo oo aad diiwaangeliso.

Waxaa lagu taliyya inaad soo gudbiso dukumiintigaaga(yadaada) oo uu la socdo Codsigaaga Dheefaha Caafimaadka oo dhamaystiran. Haddii aadan awoodin inaad sidaas samayso, waa inaad soo gudbisaa dukumiintigaaga(yadaada) Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan marki la gaaro ama ka hor **Seteembar 30**. Haddii aad u soo dirto Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan si gaar ah, fadlan xaqiji inaad ku soo qorto magacaaga koowaad iyo kan awoowgaa iyo afarta tiro ugu danbeeya ee lambarkaaga Sooshiyaal Sekuuritiga.

## Dukumiintiyada loo aqbalo Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan

Qaar ka mid ah dukumiintiyada loo isticmaali karo Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan waxaa ka mid ah:

- Nuqulka warqadda dhalashada ee ilmahaaga.
- Nuqulka warqada daryeelka korrinta, wakiilnimada sharchiyeed ama korsashada ee ilmahaaga.
- Nuqulka canshuur celinta federaalka ee ugu danbeeysay oo ay ku qoran yihiin qofka(dadka) kugu tiirsan.

Haddii aad ku darsanayso ilmaha lamaanaha qoyska, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foom dheeraada ah. Si aad u hesho liiska dhamaystiran ee dukumiintiyada la aqbalo, booqo [myseiu.be/cfk-so](http://myseiu.be/cfk-so). Wuxaad u baahan tahay inaad ka soo gudbiso hal dukumiinti oo ah Caddeynta Qofka Kugu Tiirsan ilmo walbo oo aad diiwaangeliso.

# Goorta La Codsado ama Wax Ka Baddel La Sameeyo

Waxaad codsan kartaa ceymiska daryeelka caafimaad oo tayo sare leh, oo la awoodi karo markaad xaq u yeelato marka ugu koowaad, inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ama haddii aad leedahay dhacdo nololeed muteysi leh.

## Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Caymiska Caafimaadka): Luulyo 1-20

Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) waa fursadaada sanadlaha ah ee aad ku codsanayso ama aad wax kaga baddelayso caymiskaaga. Luulyo 20 ayaa ah taariikhdaada kama dambysta ah ee aad:

- Codsan karto caymis, haddii aad xaq u leedahay oo aadan horay isku diiwaangelinin.
- Wax kaga baddeli karto ceymiskaaga ilkaha, haddii aad diiwaangashan tahay.
- Heli karto Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) U hel isla caymiska tayada sare leh ee aad haysato ilmahaaga, haddii aad shaqayso 120 saacadood ama ka badan bishi.

**Codsigaaga Dheefaha Caafimaadka oo dhamaystiran waa in la helo marki la gaadho ama ka hor Luulyo 20 si looga shaqeeyo.** Wax ka baddelka la sameeyay inta lagu jiray Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) wuxuu dhaqangeli doona Agoosto 1, 2023.

Haddii aadan rabin inaad baddesho caymiskaaga, wax ficiil ah looma baahna. Waa xaa sii heli doontaa isla ceymiska aad hadda hesho! Ma awoodi doontid inaad codsato ama wax ka baddel samayso ilaa iyo laga gaaro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee xigta, marka laga reebo inaad yeelato Dhacdo Nololeed Muteysi Leh (QLE) ma ahane.

## Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah ee Dhacdo Nololeed Muteysi Leh (QLE)

Dhacdo Nololeed Muteysi Leh waa isbaddel ku yimaada xaaladaada noolaleed — sida inuu ilmo kuu dhasho ama aad lumiso caymis kale — taas oo aad xaq ugu yeelan karto inaad hesho Muddada Diiwaangelint Gaarka ah oo 30 maal mood ah, oo kuu oggolaanaysa inaad iska diiwaangeliso caafimaadka wakhti ka baxsan Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka). Muddada 30-ka maal mood waxay bilaabanaysaa wakhtiga ay ku qabsatay dhacdada waana inaad dhamaystirto oo aad gudbiso codsigaaga waqtii xaddidan oo 30 maal mood gudahooda ah.

Dhacdooyinka noolaleed ee aad ku mutaysan karto Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah ee QLE:

- Inuu ilmo kuu dhasho ama aad ilmo korsanayso.
- Inaad lumiso caymis kale oo daryeelka caafimaad.
- Inuu furriin kugu dhaco.



Luz C.  
Daryeel bixiye, Kennewick

# Furo akoon aad ku gasho Health: My Plan



Markaad furato akoon aad ku gasho Health: *My Plan*, waxaad si fudud ku codsan kartaa ama wax kaga baddeli kartaa ceymiskaaga. Gal [myseiu.be/oe-myplan](http://myseiu.be/oe-myplan) ama iskaan gareey koodhka QR oo raac tallaabooyinkaan:

## Tallaabada 1: Dooro Register as a New User (Isku Diiwaangeli Adeegsade Cusub ahaan).

Username / Email Address

Password

SIGN IN      REGISTER AS A NEW USER

## Tallaabada 5: Buuxi Magaca Adeegsadaha, Lambar Sireedka iyo Su'aasha Ammaanka.

Username or Email Address:

Confirm Username or Email Address:

Password (at least 8 characters)

Confirm Password:

Secret Question:

Answer:

NEXT      CANCEL

## Tallaabada 2: Geli ID-ga Xubnaha ama Lambarka Social Security (SSN).

Member ID on your health card or SSN

NEXT      CANCEL

## Tallaabada 6: Buuxi macluumaadka xiriirkha oo Save Communication (Keydi Wada-xiriirkha).

\*Ugu yaraan hal taleefon lambar iyo cinwaan iimayl ayaa loo baahan yahay.

Home Phone	Mobile Phone	Work Phone	Extension
------------	--------------	------------	-----------

Preferred Phone Number for Communication:  HOME  MOBILE  WORK

Personal Email Address

Work Email Address

Preferred Email for Communication:  PERSONAL  WORK

Preferred Method of Communication:  
Select-  English

SAVE COMMUNICATION      CONTINUE LATER

## Tallaabada 3: Geli Lambarka Zip-ka iyo Taariiqda Dhalashada.

Member ID or SSN:

Name:

Zip Code:

Date of Birth:

NEXT      CANCEL

## Tallaabada 4: Dib U Eeg oo Aqbal Qodobadda iyo Shuruudaha.

Please read and accept Terms & Conditions.  
CREATE will occasionally update this Privacy Policy as reflect changes in the law or feedback. CREATE encourages you to periodically review this Statement to be informed of how CREATE is protecting your information. Your continued use of this web portal and/or mobile app after we make changes is deemed to be acceptance of those changes, so please check the policy periodically for updates.

CONTACT INFORMATION

CREATE welcomes your comments regarding this Statement of Privacy. If you believe that CREATE has not adhered to this Statement, please contact CREATE at [CREATE-Compliance@TDSB.org](mailto:CREATE-Compliance@TDSB.org). We will use commercially reasonable efforts to promptly determine and remedy the problem.

Show Full Screen

I accept Terms & Conditions     I do not accept Terms & Conditions

NEXT      CANCEL

## Tallaabada 7: Save Acknowledgements (Keydi Qiraalada).

create technology

SEIU 775 Benefits Group

YOU MAY RECEIVE ELECTRONIC COMMUNICATIONS FROM US

SAVE ACKNOWLEDGEMENTS      CONTINUE LATER

## Ku soo dejiso app-ka taleefonka MyCreateHealth taleefonkaaga casriga ah si aad si fudud ugu isticmaasho Health: My Plan.

App-ka taleefonka MyCreateHealth waxaa laga heli karaa App Store oo ku jirta iPhone-kaaga, ama Google Play Store oo ku jirta taleefonkaaga Android.



# Sida Loo Codsado ama Wax Ka Baddel Loo Sameeyo

Habka ugu fudud ee wax ka baddel loogu sameeyo ama loogu codsado caymiska adiga naftaada ama carruurtaada waa onleen ahaan inaad isticmaasho Health: *My Plan*.

## Health: *My Plan* [myseiu.be/oe-myplan](http://myseiu.be/oe-myplan)

### Tallaabada 1: Gal oo eeg maclumaadka ceymiskaaga caafimaadka ama isku diiwaangeli ceymis.

Haddii aad xaq u leedahay inaad isdiwaangeliso, waxaad fursad u yeelan doontaa inaad gujiso **Start Enrollment (Bilow Diiwaangelinta)**.



### Tallaabada 2: Dulmar iska diiwangelinta Health: *My Plan*.

- Door Lo-shaqeeyaha Guriga. Lo-shaqeeyahaaga Guriga ayaa ka jaran doona qayptaada lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah mushaharkaaga. Haddii aad leedahay wax ka badan hal loo-shaqeeye, Lo-shaqeeyahaaga Guriga ayaa laga dhigi doonaa si toos ah loo-shaqeeyaha aad la shaqayso saacadaha ugu badan. Wuxaan baddeli kartaa Lo-shaqeeyahaaga Guriga adiga oo wacaya 1-877-606-6705.
- Waxaad arki doontaa maclumaadka xaq u yeelashada ee dheef walbo.

### Tallaabada 3: Wax ka baddel doorbiditaanadaada, sida:

- Xaqiji doorbiditaanadaada wada-xiriirka - telefoonka, iimaylka ama boostada.
- Magacow luuqada aad doorbideyso.
- Ku dar maclumaadka carruurtaada (haddii ay haboon tahay).

### Tallaabada 4: Iskudiwaangeli ama wax ka baddel ceymiskaaga caafimaad.

- Qorshaha ceymiska caafimaad: Qorshahaaga ceymiska wuxuu ku saleysan yahay lambarka zip-kaaga.
- Qorshaha ceymiska ilkaha: Isla bardhig ceymisyada oo mid ka dooro noocyada ceymiska ilkaha ee la heli karo.
- Ku dar ilmo ama carruur caymiskaaga (haddii ay haboon tahay).

### Tallaabada 5: Dib u eeg xulashooyinkaaga.

### Tallaabada 6: Ku saxiix magacaaga adiga oo isticmaalaya muuskaaga ama shaashada taleefonka si aad u dhameystirto isdiwaangelinta.

### Tallaabada 7: Caddee xiriirka kaala dhaxeeya carruurta aad ku dartay caymiska.

- Wax badan ka baro bogga 5.

## Eeg oo Wax Ka Baddel Qorshaha Ceymiskaaga

### Tallaabada 1: Gal Health: *My Plan* si aad u eegto ama wax uga baddesho ceymiskaaga.

### Tallaabada 2: Iisticmaal sawir calaamadeedka safka ee ku yaala dhinaca bidix ee kore si:

- Aad u hesho Soo Koobida Ceymiskaaga.
- Aad u eegto maclumaadka xaq yeelashadaada iyo dheeftaada.
- Aad u soo gudbiso Dhacdo Nololeed Xaq-u-yeelasho Leh (haddii ay haboon tahay).
- Aad u eegto saacadahaaga shaqada.
- Aad u sameyo lacag bixinta shaqsiyadeed iyo wax kale oo badan!

## Su'aalo miyaad qabtaa?

**1-877-606-6705**

Ismiin-Jimce, 8 a.m. to 6 p.m.  
Pacific time

[SEIU775BG-caregiver@magnacare.com](mailto:SEIU775BG-caregiver@magnacare.com)



**Si aad u Codsato  
ama Wax Ka Baddel  
u Samayso adiga oo  
Iisticmaalaya Boostada  
ama Fakis:**

Ku dir boostada ama fakis codsigaaga oo dhamaystiran (oo ay la socdaan dukumiintiyadaada Cadeyntha Qofka Kugu Tiirsan haddii ay haboon tahay) cinwaanka ama lambarka fakiska ee ku qoran Codsiga Dheefaha Caafimaadka. Khidmada boostada Mareykanka ayaa la iska rabaa. Codsigaaga waa in la helo marki la gaadho ama ka hor Luulyo 20 si looga shaqeeyo.

# Sida Loo Ilashado Caymiska

Markaad caymis leedahay, waa inaad sii wado inaad shaqayso saacadaha loo baahan yahay bil walbo oo aad ku bixiso lacagta aad bil walbo bixiso (qaybta lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah) wakhtiga saxda ah si uu kuugu sii socdo caymiska caafimaad. Waxaa muhiim ah inaad u soo gudbiso saacadaha shaqada wakhtiga saxada ah loo-shaqeyahaaga si aad uga fogaato inaad lumiso caymiska, ama Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha).

## Si aad u sii heysato ceymiskaaga:

- ✓ Shaqee 80 saacadood ama ka badan bil walbo.
- ✓ Ku soo gudbi saacadaha shaqada 60 maal mood gudahooda ka dib bisha aad shaqaysay.
- ✓ Bixi lacagta aad bil walbo bixiso ee \$25.

## Si aad u sii heysato Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha):

- ✓ Shaqee 120 saacadood ama ka badan bil walbo.
- ✓ Ku soo gudbi saacadaha shaqada 60 maal mood gudahooda ka dib bisha aad shaqaysay.
- ✓ Bixi lacagta aad bil walbo ka bixiso adiga iyo carruurta kugu tiirsan oo dhamaystiran.

Haddii aad shaqayso wax ka yar 120 saacadood balse ugu yaraan 80 saacadood (80 – 119 bishi, caymiskaaga wuu sii socon donaa, balse Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ayaa dhamaan doona.

## Saacadaha aad shaqayso: sida iyo goorta caymiska la saamaynayo.

Saacadaha aad shaqayso Bisha 1 waxay saameeyaan caymiska Bisha 3. Tusaale ahaan, saacadaha aad shaqayso Janaayo waxay saameynayaan caymiska Maarsa. Haddii aad lumiso caymiska inaad shaqayn saacado kugu filan aawadeed, caymiskaaga ayaa si toos dib ugu bilaaban doona markaad bilowdo inaad shaqayso saacadaha loo baahan yahay.

Saacadaha la shaqeyay:	Jan	Feb	Maarso	Abril	Maajo	Juun	Luulyo	Agosto	Set	Okt	Nof	Dis
Waxay caymis leeyihiin:	Maarso	Abril	Maajo	Juun	Luulyo	Agosto	Set	Okt	Nof	Dis	Jan	Feb

## Maadaama caymiskaaga daryeelka caafimaad iyo Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ay leeyihiin tirada saacadaha shaqada ee la is faro oo kala duwan, waxaad wayni kartaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) walina waxaad sii haysan kartaa caymiskaaga daryeelka caafimaad.

Tusaale ahaan: haddii aad shaqayso wax ka badan 80 balse ka yar 120 saacadood bisha 1, Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ayaa dhamaan doona bisha 3 balse adiga waad sii lahaan doontaa caymiska.

BISHA 1	BISHA 2	BISHA 3	BISHA 4
Waxaad shaqaysay inta u dhaxaysa 80 iyo 119 saacadood.	Waxaad shaqaysay 120 saacadood ama ka badan.	Iyada oo ku salaysan saacadaha aad ka shaqaysay bisha 1, Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ayaa dhacaya balse adiga waad sii lahaan doontaa caymiska.	Iyada oo ku salaysan saacadaha aad ka shaqaysay bisha 2, Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ayaa dib loo soo celin doonaa.

**OGOW:** Haddii caymiska uu hakad kaa galoo 12 bilood ama ka badan, waa inaad dib u codsato caymiska daryeelka caafimaad.

Waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa COBRA, caymiska daryeelka caafimaad ee ay helaan dadka lumiya caymiskooda. Ka eeg bogga 22-aad wixii macluumaad dheeraad ah.

## Ma u baahan tahay saacado shaqo oo dheerad ah?



Haddii ay kaa dhinaadaan saacado yar, waxaad awoodi kartaa inaad isticmaasho wakhtiga fasaxa lacagta leh (PTO) ama saacadaha tabbabarka ee shaqada leh si aad u buuxiso saacadaha lagaaga baahan yahay.



Haddii aad tahay Adeeg Bixiye Shaqsiyadeed (IP) oo aad u baahan tahay inaad saacado dheeraad ah ka hesho macmiil kale si aad u sii haysato caymiska, tijaabi Carina, websaydhka shaqa ku beegida oo bilaash ah oo kaa caawin kara inaad hesho macaamiil dheeraad ah. Eeg [myseiu.be/oe-carina](http://myseiu.be/oe-carina) si aad u hesho xog dheeraad ah.

# Dheefaha Kale ee Muhiimka ah

Waxaad heli kartaa dheefo dheeraad ah oo bilaash kuu ah, oo loo qaabeeyay inay kaa caawiyaan inaad caafimaad-qab ahaato, walbahaarka kaa yaraado, aad badqab ku hesho goobta shaqada iyo inay sare u qaadaan tayada noolashaada. Waxaad heli kartaa dheefahan xitaa haddii aadan caymiska daryeelka caafimaad ka haysanin SEIU Healthcare NW Health Benefits Trust (sharciyada xaq u yeelashada shaqaynaya).



## Caregiver KICKS™

### Kabo Bilaash ah oo Loogu Talagalay

#### Daryeel Bixiyeyaasha

Hel kabaha Caregiver Kicks oo bilaash ah, oo simbirixada reeba, sanad walbo! Haddii ay yihiin kabaha hoosta alwaaxa ka ah, kabo isboorti, kabo buud kor u dheer ama kabo siman, Caregiver Kicks:

- Waa kuwo raaxa leh.
- Waxay kugu ilaalinayaan shaqada.
- Waaxay yarayn karaan xanuunka cagaha iyo dhabarka.

Intaas waxaa dheer waxaa lagu heli karo 70 nooc ka badan, oo ay soo saareen shirkado caan ah sida Reebok iyo Skechers.

Si aad xaq ugu yeelato, waa inaad shaqeyso 80 saacadood bishi, 2 bilood oo isku xiga.

## ginger

### App-ka Caafimaadka Dareenka

Haddii aad dareemayo murugo ama culays badan tijaabi Ginger, app-ka taleefonka casriga ah ee loogu talagalay caafimaadka dareenkaaga. Markaad isticmaasho Ginger, waxaad kula sheekaysan kartaa macalinka fariin qoraal ammaan ah 24/7. Xubnaha qoyskaaga ee ka wayn da'da 18 ayaa sidoo kale ku heli kara Ginger si bilaasha ah.

Haddii aad caymiska daryeelka caafimaad ka haysato SEIU Healthcare NW Health Benefits Trust, waxaad sidoo kale heli kartaa booqashooyinka fogaan-aragga oo ammaan ah oo qarsoodi ah oo aad la yeelato dhakhtar aqoonsi leh.

Si aad xaq ugu yeelato Ginger, waa inaad shaqayso ugu yaraan hal saac bishi.



Wax badan wka ogoow  
Caregiver Kicks:  
[myseiu.be/oe-kicks](http://myseiu.be/oe-kicks)



Wax badan ka ogoow Ginger:  
[myseiu.be/oe-ginger](http://myseiu.be/oe-ginger)

# Qoddobada Kooban Ee Ceymiska Caafimaadka

Aetna waa qorshaha caymis  
caafimaad oo aad heli karto, iyada  
oo ku saleysan lambarka zip-kaaga.



# aetna<sup>SM</sup>

Caymiskaaga daryeelka caafimaad wuxuu bixiyaa qaabab badan oo daryeel iyo taageero loogu helo caafimaadkaaga iyo bad-qabkaaga— iyada oo leh helitaanka barnaamijyo, dhigaalo iyo qiimo-dhimisyo si aad kor ugu qaado noloshaada oo aad u yeelato qaab noolaleed caafimaad leh.

Marki lagu diiwaangeliyo, Aetna ayaa boostada kuugu soo diri doonta kaarka Aqoonsiga Xubinta. Kaarkan waxaa ku qoran macluumaad muhiim ah oo aad u baahan doonto marwalbo oo aad daryeel lagu siinayo. Waxaad sidoo kale u isticmaali doontaa kaarkaaga Aqoonsiga Xubinta inaad ku furato akoonka Aetna onlee ahaan. Haddii aadan helin kaarkaaga wac **855-736-9469**.

La xiriir daryeelkaaga adiga oo akoon ka furanayo websaydhka xubinta Aetna ee barta [MyAetnaWebsite.com](#), ama isticmaal app-ka taleefonka casriga ah ee Aetna Health si aad u isticmaasho dheefahaaga.



## Kula Kulan Dhakhtarkaaga Bilaash

Caymiskaaga Aetna ma lahan khidmada adeegga ceymiska markaad la kulanto dhakhtarkaaga daryeelka assaasiga ah (sidoo kale loo yaqaano adeeg bixiyaha daryeelka aasaasiga ah, ama PCP). Waxaad ula kulmi kartaa PCP-gaaga hubinta fayoqabka, markaad xanuunsato. Way fududahay inaad PCP ka hesho barta [myseiu.be/oe-doctor](#).

Ceymiskaaga, waxaad sidoo kale ku heli kartaa daryeel haboon oo tayo sare leh onleen ahaan ama wicitaanka taleefonka. Tani waxaa ku jiro booqashooyinka taleefonka ama muuqaalka iyo talada telefoonka 24/7.

## Dheefaha Caafimaadka Dareenka

Caafimaadka dareenkaaga wuxuu muhiim u yahay si la mid ah caafimaadkaaga jireed. Caymiska Aetna waxaa ku jira taageero xirfadle 24/7, la-talinta la xaadiro ama fogaan-aragga, iyo dhigaalo onleen ah oo waxtar leh, iyo sidoo kale:

- **The Aetna AbleTo Support Program (Barnaamijka Taageerada ee AbleTo ee Aetna).** Hel caawin dhab ah oo ku habboon jadwalkaaga oo leh barnaamij talo-siin iyo tabbarid ah, oo 8-toddobaad socdo laguna bixiyo taleefonka/muqaal. Wac **855-736-9469** si aad wax badan u ogaato.
- **Barnaamijka Maaratna Xaalada Caafimaadka Dabeecadda ee Aetna.** Inta lagu jiro barnaamijkan qarsoodiga ah, ka garab shaqee kooxdaada daryeelka si aad u hesho baaraitan hore iyo daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay.



## Dheefaha Maqalka ee Aan Lahayn Khidmada Adeegga Ceymiska!

Iyada oo loo marayo ceymiska maqalka EPIC, waxaad u heli kartaa dhug kasta qalabka maqalka oo ku kacaya ilaa iyo \$1,200 oo aan lahayn khidmada adeegga ceymiska iyo sidoo kale booqashooyinka qof ahaanta loo xaadiro ama onleenka ah. Ka bilow barta [myseiu.be/epic](#).



Sean B.  
Daryeel bixiye, Seattle

## Ku baqso lacag kuwan baddelka u ah inaad isticmaasho gurmadka degdeggaa ah.

Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah, raadi xarunta daryeelka degdeggaa ee kuugu dhaw ama ballan isla maalintaas ah ka qabso dhakhtarkaaga. Waxaa kuu baaqan kara lacag ilaa iyo \$200 ah.

**Daryeelka degdeggaa ah lamid ma ahan daryeelka gurmadka degdeggaa ah.** Haddii aad la dhibaatooneyo xaalad naf-gooyo ah, sida wadna istaaga ama qabsinka, waa inaad aado qolka gurmadka degdeggaa ah. Haddii aad yeelato dhaawcyo jireed oo fudud, sida anqaw murgacday, booqo xarunta daryeelka degdeggaa ah.

<b>Dhakhtarka Aassaasiga ah / Booqashooyinka Onleenka ah</b>	<b>Bilaash*</b>
<b>Daryeelka Degdeggaa ah</b>	<b>\$15 Khidmadaha adegga ceymiska</b>
<b>Booqashada Qolka Gurmadka Degdeggaa ah</b>	<b>\$200 Khidmadaha adegga ceymiska</b>

\*Booqashooyinka dhaktarka daryeelkaaga assaasiga ah ma lahan khidmada adeegga ceymiska, sikastaba ha ahaatee haddii dhakhtarkaaga uu amro baaritaano ama shaqo shaybaar, waxaad bixin kartaa khidmada adeegga ceymiska ee adeegyadaas.

## Dheefahaaga Daawada Dhakhtarka Uu Qoro

Aetna waxay u isticmaashaa Shabakada Farmasiyada Tafaariiqda ee Aetna dheefahaaga daawada dhakhtarka uu qoro. Shabakada waxaa ku jira 75,000 farmasiyaal wadanka oo dhan. Waxaa muhiim ah inaad la tagto farmsiga Kaarkaaga Aqoonsiga si aad u isticmaasho dheefahaaga. Wuxaan boostada ku heli doontaa kaarka Sav-Rx oo gaar ah.

Akoon ka furo bogga intarnetka ee Sav-Rx si aad awood buuxda ugu yeelato isticmaalka iyo xakamaynta farmasigaaga. Booqo **savrx.com** si aad u bilowdo. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, kala xiriir Sav-Rx lambarka **800-228-3108**.

<b>Khidmada Adeegga Ceymiska ee Rx (Bixiyaha u Shaqeeya Shirkada Ceymiska)</b>	<b>Farmasi Daawo Ilaa iyo 30 Maalmood La Qaato</b>	<b>Ku libsashada Boostada Daawo Ilaa iyo 90 Maalmood La Qaato</b>
Daawooyinka Ka Hortagga Uurka ee Baddelka u ah Kuwa Kale*	\$0	\$0
Daawooyinka Lagu Qiimeeyo Waxtarkooda**	\$4	\$8
Daawooyinka Beddelka u Noqda Daawo Kale	\$8	\$16
Daawada shirkada gaarka ah ee la doorbidayo	\$25	\$50
Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale iyo daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee aan la doorbideyn	\$50	\$100

\*Haddii aad u shaqeypo hay'ad diimeed, ceymiskaaga caafimaadka waxaa ka reeban ceyminta ka hortagga uruka, sida lagu oggolaaday ee ku xusan ka reebitaanka diimeed ee Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo). Sikastaba, waxaad midan si bilaash ah kaga heleysaa (adiga oo walibana wax ficiil ah sameynin) Sav-Rx, inta aad ka diiwaangashan tahay ceymid caafimaad.

\*\*Daawooyinka lagu qiimeeyo waxtarkooda waa daawooyin baddel u ah kuwa kale oo loogu talagalay in lagu daaweyo xaalado caafimaad oo kala duwan.



**Wax badan ka ogoow  
ceymiskaaga barta  
[myseiu.be/oe-so](http://myseiu.be/oe-so)**

Kani waa soo koobid kooban oo ku saabsan dheefooyinka. KANI MA AHAN HESIIS AMA SHAHAADO CEYMIS. Dhammaan dheefooyinka, oo ay ka mid yihiin daryeelka baddelka ah, waxaa loogu talaglay adeegyo caafimaad ahaan muhiim ah. Qofka Xubnaha ah waxaa laga qaadi doonaa qirma wadaaga qaybta yar ee adeega ceymiska leh ama qiimaha saxda ah ee adeegaas. Si aad u hesho qodobadda ceymiska oo dhameystiran, oo ay ku jiraan xadidaadaha, fadlan ka tixraac shahaadadaada ceymiska. Sida waafaqsan Patient Protection and Affordable Care Act of 2010 (Sharciga Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo ee 2010): Carrurta kugu tiirsan aaya qaax u leh in laga diiwaangeliyo caymiskan ilaa dhalashadooda 26<sup>aad</sup>.

Dheefaha	Bixiyeyasha Shirkada Ceymiska ee La Doorbidayo	Bixiyeyasha Shirkada Ceymiska ee Aan La Doorbidaynin
Lacag jarista ceymiska	Ma jirto lacagta jarista sanadlaha ah	Lacag jarista shaqsi ahaaneed: \$500 halki mudda sanadeedba Lacag jarista qoyska: \$1,000 halki mudda sanadeedba
Lacag jarista shaqsi ahaaneed ee la wareejinayo	Ma khuseyso	Lacag wareejinta rubuc 4-aadka ayaa khuseyso
Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska	Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska ma jiro	Ceymiska wuxuu bixinayaa 80%, adigana waxaad bixinaysaa 20% oo ka mid ah Lacagta Ceymiska Ugu Badan.
Xadka lacagta jaabka laga bixiyo	<b>Xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee caafimaadka:</b> Shaqsi: \$800 qoys: \$1,600 <b>Xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee daawooyinka dhakhtarka uu qoro:</b> Shaqsi: \$400 qoys: \$800 Kharashyada jaabka laga bixiyo ee adeegyadan ceymiska leh ee soo socda waxay ka mid yihiin xadka lacagta jaabka laga bixiyo. Dhammaan kharash qeybsiga ee adeegyada ceymiska leh.	Lala wadaagay bixiyaha u shaqeeya shirkada ceymiska
Muddada sugitaanka xaalad horay u sii jirtay (PEC)	PEC ma jiro	La mid ah bixiyeyasha shirkada ceymiska ee la doorbidayo
Qiimaha ugu badan inta aad nooshayah	Aan xadidinayn	La mid ah bixiyeyasha shirkada ceymiska ee la doorbidayo ee ugu badan
Adeegyada bukaan socodka (Booqashooyinka Xafiiska)	\$15 khidmada adeegga ceymiska. Haddii aad doorato dhakhtarka daryeelka assaasiga ah oo ku jira bogga intarnetka ee Aetna, dhammaan booqashooyinka lala yeelanayo dhakhtarkan waxay lahaan doonaan khidmada adeegga ceymiska oo ah \$0	\$15 khidmada adeegga ceymiska, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa
Adeegyada isbitaalka	<b>Adeegyada bukaan jiifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. <b>Qalliiinka bukaan socodka:</b> \$50 khidmada adeegga ceymiska	<b>Adeegyada bukaan jiifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. Lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa. <b>Qalliiinka bukaan socodka:</b> \$50 khidmada adeegga ceymiska, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa
Daawooyinka dhakhtarka uu qoro (daawooyinka qaarkood ee la isku duro waxaa lagu dabari karaa adeegyada Bukaan Socodka)	Daawooyinka lagu qiimeeyo waxtarkooda/Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (tier 1)/daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (tier 2)/shirkadaha aan la doorbideynin (Tier 3) \$4/\$8/\$25/\$50 khidmada adeegga ceymiska Insulin: Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (tier 1)/daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (tier 2)/shirkadaha aan la doorbideynin (Tier 3) \$0/\$0/\$25 khidmada adeegga ceymiska	Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo/daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo/la doorbideynin \$13/\$30/\$55 khidmada adeegga ceymiska Insulin: Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (tier 1)/daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (tier 2)/shirkadaha aan la doorbideynin (Tier 3) \$13/\$30/\$35 khidmada adeegga ceymiska
Ku iiwashada boostada ee daawada dhakhtarka uu qoro	2x kharash qeybsiga daawo qoraalka dhakhtarka ee daawada 90-ka maalmood la qaato	Aan ceymis lahayn
Daawaynta jir duridda ah	20 boqosho halki mudda sanadeedba \$0 khidmada adeegga ceymiska	Lala wadaago xadka booqashada bixiyeyasha shirkada ceymiska \$15 khidmada adeegga ceymiska, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa
Adeegyada ambalaaska	Ceymiska wuxuu bixinayaa 80%, waxaad bixinaysaa 20%	La mid ah dheefta bixiyeyasha shirkada ceymiska ee la doorbidayo
Balwada maandooriyaha	<b>Bukaan jiifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska	<b>Bukaan jiifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa. <b>Bukaan socodka:</b> \$15 khidmada adeegga ceymiska, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadayaa

Dheefaha	Bixiyeyasha Shirkada Ceymiska ee La Doorbidayo	Bixiyeyasha Shirkada Ceymiska ee Aan La Doorbidaynin
<b>Aalad, qalab iyo saad</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Qalabka Caafimaadka ee Raaga</li> <li>Qalabka lafaha iyo murqaha lagu kabo</li> <li>Naasa-reebka qallinka naasaha ka gadaal ku xadidan labo (2) lix bilood (6) oo kasta</li> <li>Saadka caloosha lagu dolooliyo</li> <li>Qalabyada isbeerka jirka</li> </ul>	Waxaa la dabbaray 50%	Waxaa la dabbaray 50%, lacag jarista ayaa la isku sameeyaa
<b>Saadka sonkoworga</b>	Insuliin, cirkbado, sirinjeero iyo mindi dalooliso ah-eeg daawooyinka dhakhtarka uu qoro. Bamka insulin-ta laga qaato ee bannaanka yaalo, mashiinta cabirta sonkorta dhiiga, alaabaha iyo saadka wax lagu baaro-eeg aaladaha, qalabka iyo saadka. Marka aaladaha, qalabka iyo saadka ama daawada dhakhtarku qoro ay ceymis leeyihii oo ay xadidaada dheefta leeyihii, saadka sonkoworga xadidaadahan ma qaban karaan.	Insuliin, cirkbado, sirinjeero iyo mindi dalooliso ah-eeg daawooyinka dhakhtarka uu qoro. Bamka insulin-ta laga qaato ee bannaanka yaalo, mashiinta cabirta sonkorta dhiiga, alaabaha iyo saadka. Marka aaladaha, qalabka iyo saadka ama daawada dhakhtarku qoro ay ceymis leeyihii oo ay xadidaada dheefta leeyihii, saadka sonkoworga xadidaadahan ma qaban karaan.
<b>Adeegyada sheybarka cudur ogaanshaha iyo raajada</b>	<b>Bukaan jiifka:</b> Lagu dabaro oo hoos imaada adeegyada isbitaalka <b>Bukaan socodka:</b> Waxaa loo dabaraa si dhameystiran	<b>Bukaan jiifka:</b> Lagu dabaro oo hoos imaada adeegyada isbitaalka <b>Bukaan socodka:</b> Lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadaya
<b>Adeegyada gargaarka degdeega ah (khidmada adeegga ceymiska waa la iska dhaafayaa haddii la seexiyo)</b>	\$200 khidmada adeegga ceymiska	\$200 khidmada adeegga ceymiska
<b>Baaritaanada maqalka (joogtada ah)</b>	\$15 khidmada adeegga ceymiska	\$15 khidmada adeegga ceymiska, lacagaha la jaro iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ayaa la iska qaadaya
